



Magangeliyo doone: Waxa la kordhin doonaa mudadda rafcaan-qaadashada, waxa sidoo kale la fududayn doonaa helidda looyarka

Waxa la kordhin doonaa mudadda rafcaan-qaadashada go'aanadda ka soo baxa dalabka magangeliyo doonka. Sharcigan oo hir gelii doona 1.8.2021, wuxuu sheegayaan

- in rafcaanka loo diran karo maxkamad-dowladeedka 30 beri gudahood, marka laga bilaabo, wakhtigii Xafiiska Imigreeshinku ku wargelisay go'aanka.
- in sidoo kale codisiga rafcaan-qaadashada loo diro karo maxkamad-dowladeedka sare 30 beri gudahood, marka laga bilaabo, wakhtigii maxkamad-dowladeedka hoose ku wargelisay go'aanka.

Ka hor waxay ahayd in 21 beri gudahood rafcaanka loogu diro maxkamad-dowladeedka hoose, maxkamad-dowladeedka sareenna 14 beri gudahood loogu diro. Marka uu sharcigu is bedelo, wakhtiga rafcaan-qaadashada labada maxkamadoobba way kordhayaan.

Markaad waraysiga marayso, sidii hore si ka fudud ayaad looyer bilaa lacag ah ku heli doontaa

Markaa looyarka laguma xujaynayo in xaalad aad u adag oo keliya uu waraysigaaga kaga qayb geli karo, si uu lacagtiiisa u helo.

Laakiin looyarku isagaa weli go'aamin doona ka qayb-qaadashada waraysiga, haddii aad rabto in looyarkaagu waraysigaaga ka qayb qaato, kala hadal oo kala tasho xaaladda, waraysiga ka hor.